



**Akoonka Ganacsiga  
Qof kali ah leeyahay**

**myBank**  
Wherever you go

Soomaalidu waa dad leh dhaqan ganacsi oo dabiici ah, iyaga oo ganacsi ku leh gees kasta oo adduunka kamid ah.

Koontada noocana ah waxaa loogu talagalay shaqsiyaadka ganacsatada ah ee maamula meherado yaryar oo ay iyagu leyihiin. Koontadan ayaa ka caawinaysa macaamiisha inay si sahlan iskaga bixiyaan biilasha lagu soo dallaco ganacsiyadooda, iyaga oo adeegsanaya system-ka bixinta biilasha ee MyBank. Waxaa sidoo kale akoonkani sahlayaa in meheradahan yaryar lagu siiyo lacagaha uga imaanaya macaamiishooda, iyada oo la adeegsanayo technology amnigiisu suganyahay, isla markaana adeegsiisu sahlanyahay sida adeegag QR code powered payments, E-commerce, POS terminal iyo Mobile and internet banking.

## Faa'iidooyinka Akoonkan:

- Jeeg buug ka kooban 50 xaashi.
- POS machine ay macaamiishu ku bixin karaan lacagaha kolka ay kaa iibsadaan badeeco ama adeeg.
- Akoonakani waxaa kale ee uu kuu ogolaanayaa in macaamiishu toos lacago ugu wareejiyaan xisaabtaada gaancsiga marka ay wax kaa iibsadaan, iyaga oo adeegsanaya QR Code system oo ah hab casri ah oo lagu scan gareeyo code-ka ganacsiga, halkii macaamiishu qori lahaayeen akoon number-kaaga.
- Akoonkan waxaa kale ee uu kuu suuragelinayaa in macaamiishu hab online ah wax uga iibsan karaan meheraddaada, iyaga oo adeegsanaya adeegga E-COMMERCE.
- Statement ga akoonkaaga oo si bille ah laguugu soo diro si otomatik ah.
- Si sahlan oo lacago lagaaga soo diri karo, isla markaana aad ugu dirsan karto dibedda, adiga oo adeegsanaya adeegga Swift iyo kannaallada kale ee casriga ah ee lacagaha la isugu diro.
- Si sahlan (Online ah) oo aad isaga bixin karto dhamaan biilasha iyo lacagaha kale ee lagugu soo dallaco sida biyaha, korontada, TV-ga, Kharajaadka laysanka ganacsiga iyo qaybo kale oo badan.
- Amar lacag-bixin joogto ah oo aad hal mar bixin karto, deedna bil ama sitimaan kasta si otomatik ah lacagtii looga wareejinayo akoonkaaga, lana dhigayo akoonka ciddii aad dalbatay in lagu wareejiyo. Lacagaha aad habkan ku wareejin karto waxaa ka mid ah kirada goobtada ganacsi-ga IWM.

- Waxa aad si bilaash ah uga faa'iideysan kartaa warbixinnada dhaqaalaha dalka ee bankigu diyaariyo, iyo talooyinka ganacsi ee bankigu bixiyo.
- Internet iyo Mobile banking kuu sahlaya in aad akoonkaaga maamulato goor kasta iyo goob kasta oo aad joogto.
- SMS lagugu soo wargelinayo dhamaan transactions-ka ka dhaca akoonkaaga.
- 24-ka saac iyo 7-da maalin ee sitimaanka oo aad si online ah ula sheekaysan karto shaqaalaha bankiga, si ay kaaga caawiyaan wixii cillada, cabasho ama su'aal ah ee aad qabto. Shaqaalaha bankiga waxa aad kula hadli kartaa website-ka bankiga, Facebook iyo WhatsApp.
- Waxa aad ka faa'iideysan kartaa hababka maalgelinta ganacsiga ee bankiga sida LC-ga, Bank guarantee IWM.
- Waxa aad si sahlan oo online ah u bixin karataa mushaarka shaqaalahaaga.
- Adeegga sarifka lacagaha qalaad.
- Waxaa lagu samaynayaa qof aad si gooni ah ugala soo xiriirto dhamaan waxyaalaha aad bankiga uga baahato.

## Shuruudaha Furista Akoonkan:

1. Aqoonsiga (National ID ama passport) milkiilaha ganacsiga.
2. Koobi xeer-hoosaadka lagu aasaasay ganacsiga.
3. Laysanka ganacsiga.
4. Cinwaanka ganacsiga ama meheraddu ku taal.
5. Caddaynta/faahfaahinta nooca ganacsiga.
6. Labo sawir oo nooca passport-ka ah.
7. Warqad codsi ah oo ganacsaduhu u soo qoro bankiga, isaga oo ku codsanaya in akoonka loo furo, isla markaana ku caddaynaya cidda iyo habka akoonka loo maamulayo.





 7777  +252 1 847777 | +252 62 3737777

 +252 61 3737777

 [info@mybank.so](mailto:info@mybank.so)

 [www.mybank.so](http://www.mybank.so)

  [MyBank.so](https://www.facebook.com/MyBank.so)

 [MyBankso](https://twitter.com/MyBankso)

Head Office / Branch Location  
Mogadishu, Somalia

*my*